



Holstebro 26.da nov 2010

Macluumaad sharci cusub:

**Sharci cusub oo qasab uga dhigaya dhallinyarada 15-17 kaa waxbarasho ama shaqo**

Laga bilaabo 1.janaayo 2011 waxaa dhaqan gelaya sharci cusub.Sharcigaasi wuxuu waajib ka ka dhigayaa waxbarasho,shaqo ama nashaadaat kale oo ku caawinaya qofka dhallinyaradaa inuu waxbarasho dhammeystiro.

Sida uu qabo sharciga cusubi qofka dhallinyaradaa waxaa laga doonayaa inuu ku qeexo qorshihisa waxbarasho sida uu uga soo baxayo/baxeyso. Wuxuu tusaale ahaan ku sameyn karaa taas

-Inuu bilaabo waxbarashada dhallinyarada(mida xirfada-, ama dugsi sare)

-Inuu bilaabo waxbarashada xirfada EGU

-Inuu bilaabo dugsi wax soo saar

-Inuu bilaabo iskoolka aqoon kororsiga guud oo loo yaqaano (højskole) ama kuwa dhalinyarada oo loo yaqoono (efterskoler),kan guriga(domestikada)-ama kan farsamada gacanta.

-Inuu qaato waxbarasho privati ah oo qofka xaq u siineysa inuu qaato caawimaada waxbarashada(SU)

- Inuu shaqeeyo ugu yaraan 18 saacadood todobaadkii

Qorshaha waxbarashada wuxuu qofku la kaashanayaa qoristeeda talo bixiyaha waxbarashada dhallin yarada.

Kommunuhu wuxuu kormeerayaa oo la soconayaa, in qofka dhallin yaradaa kasoo baxo waajibkiisa wuxuuna qofka ka qaadi karaa caawinta dhallin yarada( taasoo laga billaabo 1.janaayo 2011 badaleysa lacagtii caruurta lasiin jirey ee dadka da,doodu u dhaxeeyso 15-17) haddii qofku raaci waayo qorshaha waxbarashada.

Qof la taliye waxbarasho ah oo ka tirsan qeybta talo siinta waxbarashada dhallinyarada ayaa qofka dhallinyaradaa lasoo xiriiraya marka uu ogaado inuu qorshihii waxbarasho raaci waayey.Qofkaas dhallinyaradaa waxaa markaas kaddib loo soo bandhigayaa hawl cusub ugu danbeys 30 maalmood oo danbe.

Salaan saaxiibtinimo

Waxbarashada Dhallinyarada-Norvestjylland